



Ogaysiis ku socda Shaqaalaha

Waa sharciga! Kuwo loo shaqeyyo waa in ay ku dhejiyaan ogeysiiskan meel ay shaqaaluhu ka akhrin karaan. (Xeerka Washington 51.14.100 ee Dib-loo-eegay)

Haddii dhaawac shaqo uu dhaco

Cidda aad u shaqeyso iyadaa is-caymisa. Waxaad xaq u leedahay dhammaan dheefaha uu u baahan yahay sharciyada (caymiska warshadaha) magdhowga shaqaalaha ee gobolka Washington. Dheefahan waxaa ka mid daaweyn caafimaad iyo beddelka ujuurrada oo qayb ahaan ah haddii dhaawacaaga shaqada ama cudurka la xiriira uu u baahan yahay in aad shaqada ka maqnaato. U hoggaansamidida sharciyadan waxaa nidaamiya Waaxda Shaqaalaha & Warshadaha (L&I).

Waxa ay tahay in aad sameyso

Soo sheeg dhaawacaaga. Haddii aad dhaawacanto, iyadoon la eegin sida yar ee uu dhaawaca u muuqdo, la xiriir qofka ku xusan warqaddan sawirka ee daabacan.

Hel daryeel caafimaad. Marka ugu horeysa ee aad aragto takhtar, waxaad dooran kartaa bixiyaha daryeel caafimaad kasta ee u qalma in uu dhaawacaaga uu daaweeyo. Daryeelka sii socda, waa in uu ku daaweeyo takhtar ku jira shabakada caafimaad ee L&I. (Ka hel bixiyeyaasha shabakada www.Lni.wa.gov/FindADoc.)

Bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee u qalma waxaa ka mid ah: caafimaadka, takhaatiirta lafaha iyo murqaha, habka daaweynta ku saleysan riixidda, duugidda iyo dalliiga, daaweynta dabiiciga ah iyo xannaanada lugaha; takhaatiirta ilkaha, arag cabbirayaasha, takhaatiirta caafimaadka indhaha; kaaliyayaasha takhaatiirta; iyo xirfadlayaal kalkaaliye diiwaangashan oo heer-sare ah.

Sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah u codso sheegashadaada. Dhaawaca shaqada gudaheeda ah, waa in aad ka xareyso sheegashada loo shaqeyahaaga hal sano gudahiisa ka-dib maalinta uu dhaawaca dhacay. Cudurka shaqada, waa in aad xareyso sheegashada laba sano gudahooda ka-dib taariikhda uu bixiyaha daryeel caafimaad uu kuugu sheego qoraal in xaaladaadu ay tahay mid shaqo la xiriirta.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama caawimaadda arrin magdhowga shaqaalaha la xiriirta waxaad kala xiriiri kartaa Gardoonka Shaqaalaha Dhaawacmay ee Is-Caymiyaha lambarkan 1-888-317-0493.

Si aad u soo sheegto dhaawac:

Haddii aad ku dhaawacanto shaqada ama cudur aad shaqada ka qaado, si degdeg ah ugu soo sheeg dhaawacaaga ama xaaladaada qofka hoos lagu magacaabay:

Magaca: _____

Telefoonka: _____

Marka la codsado, taageerada luqadda ajnabiga ah iyo qaababka dadka naafada ah waa la heli karaa Wac 1-800-547-8367. Isticmaalayaasha TDD, wac 360-902-5797. L&I waa loo shaqeyye fursad loo siman yahay.

Ku saabsan warqadda sawirka ee daabacan ee goobta shaqada ee loo baahan yahay

Waxaad tagtaa www.Lni.wa.gov/RequiredPosters si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan warqadaha sawirka ee daabacan ee ka yimaada L&I iyo hay'adaha kale ee dowladda.

Self-Insurance Section
Department of Labor & Industries
P.O. Box 44890
Olympia WA 98504-4890